

Shan talaabo oo ku socda:  
**Goobta Daryeelka Dabiiciga ah**



## Waa maxay sababta loo aadayo dabiiciga?

Daaradaheenu waa madadaalo, qurux badan, goob baaxad wayn oo loogu talagalay nasashada. Laakiin si loo daryeelo, had iyo jeer waxaynu u isticmaalnaa biyaha si aan haboonayn, anaga oo soo saarnaa qashin badan iyo inaynu aad u isticmaalno kiimiko u daran deegaanka iyo caafimaadka qoysaskeena.

Warka wanaagsani wuxuu yahay inaynu samayno isbadal fudud oo aynu awoodi karno:

- In aynu lacag kaydino
- In aynu waqti kaydino
- In aynu badbaadino deegaanka
- In aynu ilaalino caafimaadka qoyskeena
- In aynu samayno daarad caafimaad qabta, qurux badan... iyada oo aan aad loo shaqaynaynin!



## 1 Dhisida carro caafimaad qabta

Oo leh carro iskujira iyo moos

Carradu way nooshahay, nolosha carradana dhibaato ayaa soo gaarta. Qaado buuxda oo carro ah waxaa ku jira 4 milyan oo noole ah!

Carrada ayay kala furfurtaa, waxay dib u warshadeeyaa nafaqada, waxay dhirta ka caawisaa kaydinta biyaha, waxaa kale oo ay ka ilaalisaa dhirta cudurka.



- Ku nafaqee carradaada carro isku jir ah. Qod 1 ilaa 3 iinji oo carro isku jira kuna samee weel marka la beerayo.
- Ku diyaari carro isku jira guriga, ama iibso jawaano ama qiyaas badan.
- Isku qas! Ku baahi 1 ilaa 3 iinji oo carro isku jira, caleemo, doog, jirida geedka, ama jajabka alwaaxda si ay u ilaaliyaan biyaha, uguna hortagaan haramaha, oo quudi carrada.
- Miyaa loo baahan yahay Bacrimiye? Ku dhaqaaq dabiiciga! Bacrimiyayaasha Dabiiciga ah waxay quudiyaan dhirta muddo dheer aad ayeyna suura gal u ahayn inay maydhaan durduradeenu.

*Xasusnoow, dhirta caafimaadka qabtaa inay ka baxdo carro caafimaad qabta.*

## 2 Ku beer jiidaada saxda ah

Oggow daaradaada. Goobta cadceedu hayso ama hadh ka jiro? Carradu ma engagan tahay mise qoyan tahay? Kadibna dooro dhirta saxda ah meesha ku haboon—dooro dhirta ka baxda ceelasha ku yaala Northwest iyo xaaladaha ku dhexyaala daaradaada dhexdeeda.



- La soo bax dhir iska caabisa cayayaanka oo isticmaasha biyo yar.
- Isugu leexi dhirta sida ay isku leeyihiin dhanka baahidooda biyo, cadceed iyo carro.
- Isku simid iyo khudaar ayaa dhib badan. Waxay ka bixi doonaan meel cadceedi ay ka dhacayso oo kaliya, saaqyo fican leh, jiido siman leh.
- Sii dhirta bilow wanaagsan adigoo diyaargaraynaya carrada oo ay weheliso carro la isku daray.
- Samee goob loogu talagalay duur-joogta adigoo isticmaalaya geedo iyo dhirta dhulka loogu yimid (asalka ah).

**Marka ay soo gaarto daaradaada, u shaqee si hagar la'aan ah!**

### 3 Baro waraabinta haboon

Dhibaatooyinka dhirta intooda badan waxaa sababa waraabinta xad dhaafka ah. Badbaadi lacagta aad ku bixinayso biilasha biyaha oo beer dhir caafimaad qabta adigoo aad u waraabinaaya, laakiin aan joogtaynaynin.



- Qoy dhammaan jiida xiddidada, kadibna u oggolow inay carradu engagto kahor intaanad mar labaad aadan waraabin.
- Tiri dhibicdii kasta adigoo ku walaqaya bacrimiyayaasha, dooro dhirta abaarta ku baxda, adigoo isticmaalaya tubo biyood iyo biyaha tilmaan qiyaas leh, waraabi oo keliya xilliga hore ee aroortii iyo galabtii si loo yareeyo uumi baxa.
- Isticmaal nidaamka waraabinta iskii isku maamula. Yeelo baadhitaan khibrad leh oo sannadkii kasta habeey. Hubi liigitaanka bil kasta. Ha waraabinin haddii muddo dhawayd uu roob da'ay.
- U oggolow qoyaanka. Biyo ku shubista tooska ah meelaha dhirta la rusqeeyey ama weelka ay ku dhex jiraan. Isticmaal shay dabool leh. Caawi carrada si ay u soo nuugto dhibicda roobka adigoo isticmaalaya carro isku jira iskuna dhex walaqaya.

### 4 Laba jeer kafikir kahor intaanad isticmaalin sunta cayayaanka disha

Saynisyahanadu waxay oggaadeen 23 sunta cayayaanka disha (haramaha iyo dukhaan dilaha) ee laga helo durduradeena. Xad dhaaf isticmaalista aaladahani waxay u daran yihiin carrada, waxay u daran yihiin kalluunka, waxay u daran yihiin caafimaadka qoyskeena.



- Ku bilow kahortag. Dooro dhirta iska caabida cudurada, oo gacanta kaga gur haramaha ka hor inta aanay faafin.
- Aqoonso dhibaataada kahor dhibaataada intaanad buufin, burburin ama aanad cadho burburin. Bakteeriyada badankoodu waa bakteeriyo wanaagsan!
- Oggolow waxyeelada yar – sii waqti ugaadhsadayaasha dabiiciga ah si ay u xakameeyaan cayayaanka/xasharaadka.
- Dooro ugu yaraan dariiqada suntan lagu xakameeyo. Aaladaha suntan intooda badan ayaa hadda la heli karaa.
- Isticmaal kiimikada cayayaanka lagu dilo si ay kuugu noqoto meesha ugu danbaysa ee lagu isticmaalo karo marka dariiqo kale laga fursan waayo.
- Ku badal dhibaataada dhirta kuwa iska caabiya cayayaanka.
- Miyey ku haysataa dhibaato daran oo cayayaan? Wac Khadka tooska ah ee Beerta.

### 5 Baro daryeelka ruqsaynta dabiiciga ah

Way fududahay in la isla meel dhigo dhibaatooyinka si looga shaqeeyo doogeena rusqaysan, halkaas oo had iyo jeer kiimikada iyo biyaha aynu u isticmaalno, soo saar qashinka intiisa badan oo aad u shaqee!



- Aad u rusqee (1 ilaa 2 iinji) oo ka tag biinanka. "Meertada dooga" ma sababto saqaf sare, dooga isku simana waxay ka dhigtaa mid caafimad qaba siisaana nafaqayn madax banaan!
- Si macquul leh ugu Nafaqee badhtamaha bisha Sebtabar ama Maajo "isku jirka dabiiciga" ama bacrimiyaha "sida fudud loo sii daayo".
- Aad u waraabi, si ay u qoyaan dhammaan jiida xiddidku, laakiin aan joogto ahayn.
- Ku Horumari hawo siin iyo abuuris fara badan dooga aan isku sinayn iyo kor tuulista carada isku jirka ah.
- Ha isticmaalin "Haramaynta iyo quudinta" ama sunta kale cayayaanka disha. Aaladaha haramaynta sidayaashoodu ay dheer yihiin ayaa si yar oo sahlan u harameeya.
- Tixgali isku badbadalaada si la isugu simo meelaha kala dheer, jiidaha hadhaysan ama u dhow durdurada iyo harooyinka.

### Miyaad rabtaa inaad oggaato waxyaalo badan?

#### Su'aalaha?

Wac Khadka Tooska ee Beerta **206-633-0224**.  
email: [help@gardenhotline.org](mailto:help@gardenhotline.org)  
web: [www.gardenhotline.org](http://www.gardenhotline.org)

#### Qaniimaadka:

- Carro dhisida iyo Carro nafaqaynta [www.kingcounty.gov/soils](http://www.kingcounty.gov/soils)
- Beerta iyo Daarada Northwest [www.kingcounty.gov/natural-yard](http://www.kingcounty.gov/natural-yard)
- Daryeelka Daarada Dabiiciga ah [www.seattle.gov/util/services/yard](http://www.seattle.gov/util/services/yard)
- Daryeelka Biyaha [www.savingwater.org](http://www.savingwater.org)
- Khabiirada Beerawalayaasha WSU <http://gardening.wsu.edu>
- Tuurista Sunta cayayaanka iyo iskubadalkooda [www.lhwmp.org](http://www.lhwmp.org)
- Doorashada dhirta saxda aha iyo goobta saxda ah [www.GreatPlantPicks.org](http://www.GreatPlantPicks.org)
- Dhirta deegaanka loogu yimid [www.kingcounty.gov/GoNative](http://www.kingcounty.gov/GoNative)



Alternative Formats On Request 206-296-4466 • TTY Relay: 711 • 1-800-325-6165 ext. 6-4466